



Hubsiimada Warka

Hagaha Hannaanka Iska Hubinta Wararka
Baraha Bulshada

Iska hubinta wararka

Muuqaallada, sawirrada, iyo wararka ay sameeyaan dadka caadiga ee isticmaala baraha bulshadu, waa il muhiim ah oo laga helo xogo u dhigma kuwa ay warfidiyeenka xirfadda lihi ku dhex sameeyaan xarumaha warbaahinta iyo Istuudyasha wararka. Mararka qaarkoodna waxaa dhacda in war lagu baahiyey baraha bulshadu uu si aad ah u faafo, kaddibna ay warfidiyeenku qaataan, si ay iyaguna uga sii tebiyaan warbaahinta rasmiga ah.

Haddaba, in kasta oo xogaha lagu faafiyo baraha bulshadu ay maanta kaalin muhiim ah kaga jiraan samaynta wararka xiisaha leh, haddana xogahaasi waxa ay mar kasta halis u yihiin been iyo buunbuunin, ama in ay yihiin warar, sawirro ama muuqaallo laga leexiyey fahamkii saxda ahaa ee ay ahayd in ay bixiyaan, tusaale ahaan in ay yihiin sawirro ama warar laga been abuuray goorta ay dhaceen iyo goobta ay ka dhaceen. Sidaas awgeed waxaa waajib ah, xogaha iyo sawirrada laga helo baraha bulshada in la mariyo habraac lagu hubinayo jiritaankooda iyo in ay buuxiyeen shuruudihii looga baahnaa warka (News Validation and Verification), iyada oo la adeegsanayo xirfadaha tifatir, iyo farsamooyinka teknoolajiyadeed ee hubinta, ka hor inta aan la faafin.

Sidaas oo aan la yeelin, suurtagal ma noqon karto in lala macaamilo xogaha, sawirrada iyo muuqaallada sida daadka u burqanaya ee ay dadka caadiga ah ee isticmaala baraha bulshadu (User Generated Content – UGC) si toos ah ama faallo ahaan u faafiyaa.

FG:

Hubintu kuma koobna keliya in la caddeeyo run ahaanshiyaha in muuqaalka ama sawirku uu yahay mid aan la farsamayn ama la isku rakibin, ama in warka lagu baahiyey baraha bulshadu uu yahay mid sal iyo raad leh, balse waxa kale oo ka mid ah 'in la hubiyo' saxnaanshiyaha qaabka xogta loo soo weriyey, ama fahamka ay xogta la soo weriyey bixinaysaa in uu yahay kii saxda ahaa ee ay sheekada asalka ahi bixinaysay. Tusaale ahaan; mar baraha bulshada aad loogu faafin jiray xogo iyo muuqaallo ama sawirro ka warramaya waxa loo yaqaanno 'Ku jihaadka guurka' waxaa la ogaaday in xogtaas iyo sawirradaasi ay dhammaantood ahaayeen kuwo aan saxnaanshiyahooda la isku hallayn karin.



Xogta uu sameeyo adeegsadaha baraha bulshadu

Wararka degdegga ah (Breaking News)



Saddex carruura oo isku qoys ah ayaa lagu dilay
Garaacista Masar ee magaalada Darnah



Duufaan dabyl ah ayaa ku dhufatay xerada qaxootiga Sactar ee dalka Urdun, waxa ay ku soo beegantay xilli heerkulku uu gaadhey heer aad u sarreeya, korontaduna go'antayah.

Aafooyinka Dabiiciga ah



Duufaan dabyl ah ayaa ku dhufatay xerada qaxootiga Sactar ee dalka Urdun, waxa ay ku soo beegantay xilli uu heerkulku uu gaadhay heer aad u sarreeya, korontaduna go'antahay.



Xogta uu abuuro Isticmaalaha Baraha Bulshadu

Shilalka iyo falalka is miidaaminta ah



Sportsnet

TV Network · 453,107 Likes · July 19 ·

[Like Page](#) ▾

Libaax badeed ayaa weeraray Mick Fanning, xidigga ciyaarta oogada biyaha (Surfing), xilli uu ka qaybgalayey tartanka J-Bay Open. Laakiin ninkan oo lagu naanayso ‘Hillaaca cad’ waxa uu ku guulaystay in uu ka baxsado iyada oo aanay dhibaato soo gaadhin.



Munaasabadaha bulsho

 Nadia el-Maggd تانيا follows
2ooley.com @2ooleyNews · Jun 1

Turkiga ayaa maalgeliyey xaflad aroos wadareed oo ka dhacday Qasa



Maxaa waajib ka dhigaya hubsuumada warka?

Haddii aanad iska hubsan sawirrada lagu faafyo baraha bulshada oo aad wararkaaga warbaahinta ku darsato, waxa aad – ku talagal ama ku talagal la'aan- uga qayb qaadanaysaa marin habaabinta cidda uu warkaasi gaadho. Waxa aana dhici kartaba in ay ka dhashaan raadad taban oo khalkhal geliya kalsoonida uu qofku ku qabo run sheegnimadaada, saxafi ahaan. Xitaa haddii aad warkaas degdeg uga dabatagto oo aad qirato in aad ku qaldantay qaadashada sawirkaas ama xogtaas, dibna aad ka ogaatay in ay been ahayd.

Dhaawaca warkaasi uu sharafkaada gaadhsiiyey waa uu dhacay, waana ay adagtahay in aad ka soo kabato, cudurdaar kasta oo aad samayso.





Maxaa qasbaya in warka la hubsado?

هذه ليست سيناء عام 2015، إنها فلسطين المحتلة عام 2012

nermin masoud retweeted
@youm7 · اليوم السابع Jul 1
#Siinaay | Weerar ay diyaaradaha qummaatiga u kaca ee Abaaji ku qaadeen xubno argagaxiso ah oo ku sugnaa #Sheekh_Suweyd iyo #Alcarish ayaa sababay dhimasho



Qorrax madoobaadkanina 2015 kii ma
uu dhicin ee waa 2010 kii



Maxaa qasbaya in warka la hubsado?

Sawirkanina ma aha Yemen iyo 2015 kii,
balse waa Ciraaq 2003.



قناة العربية
@AlArabiya



U Gaar ah Al-Carabiya: #Duufaanta_Alxasmi ayaa burburisay cutubyo
ka tirsan ciidamada Xuutiyiinta ee #Sacdah

Translate from Arabic



#Duufaanta_Alxasmi ayaa burburisay cutubyo ka
tirsan ciidamada Xuutiyiinta ee Sacdah

Sawirkani Nepal ma aha ee waa Masar sannadkii 2015



DHUL GARIIRKA KA DHACAY NEPAL! Aad u weyn oo cabbirkiisu yahay 7.8, kumannaan qof ayaa dhintay, burburka ku hoos xayiran ama dhaawac ah.



PressResetRadio



Subscribe

4,580

1,355,997

+ Add to

Share


*** More

601

271

Xeerarka lagama maarmaanka u ah hubinta warka

- 1. Ha sii malaysan:** Marka aad xog hubinayso, tusaale ahaan sawir, haddii marka horeba malahaagu u badan yahay in uu run yahay, waxa ay maskaxdu isku qancinaysaa in uu run yahay, go'aanka kuu soo baxayaana malahaas ayaa uu ku dhismayaa. Sidaas awgeed, inta aanad xogta runnimadeeda qiimayn, marka hore waa in aad adigu meel dhexdhexaad ah ka taagantahay, run iyo beenba aad ka filan karto. Markaas kaddib ayaa aad raadinaysaa caddaymaya labadaas midkood xoojinaya.
- 2. Boqolkiiiba Boqol Suurtagal ma aha:** Marnaba suurtagal kuuma noqonayso in sawirka runnimadiisa aad boqolkiiiba 100 xaqijiso. Inta aad runta ka gaadhaysaa, waxa ay ku xidhantahay, illaa heerka aad ku qanacdo hadba natijada aad heshay, iyo sida aad u kala xoojisay kafadaha qaladka iyo saxa kala tilmaamaya ee kuu soo baxay, ama midka aad raacdya labada dhinac ee sawirka beennimadiisa iyo runnimadiisa kuu kala sheegaya.
- 3. Habraac samayso:** Inta aanay iman in xog ama sawir aad hubiso sax iyo qalad midka uu yahay, waa in ay hore kuugu sii diyaarsanaadaan hannaanka aad u marayso iyo siyaasadaha tifatir ee aad u raaci doonto hubinta xogta. Waxa ay kaa caawinaysaa in aanay xaalad jaahwareer iyo qarbo-qarbo ah gelin xilliyada go'aanka degdegga ah la qaadanayo.
- 4. Daawadaha Wargeli:** Waa in aad diyaariso hab uu daawadaha ama akhristuhu ku ogaan karo dhabbaha ama habraaca aad u martay hubinta runnimada xogta ama sawirka iyo muuqaalka aad baahisay, illaa heerka aad ku baraarugsantahay muhiimadda hubinta warka iyo tallaabooyinka aad u raacdya hubinta. Daahfurnaantaasi waxa ay abuuraysaa kalsoonni in lagu qabi karo xogta ama sawirka aad baahisay.



Tallaabooyinka Muhiimka Ah Ee Hubinta Wararka

1. Ma taqaanna qofka baahiyey xogta aad baraha bulshada ka qaadanayso? Ma yahay qof la garanayo, ama hay'ad iyo cid rasmi ah? Ma kuu suurtageli kartaa in aad toos ula xidhiidho ciddaas?
2. Raadi sawirka aad qaadanayso asalkiisa hore. Ma sawir rasmiya ayaa uu ahaa, mise waa sawir fiidyow laga dhex qabtay (Sameeyey). In aad markasta sidaas yeeshaa waxa ay kuu suurtagelinaysaa in aad kala garato in sawirku uu yahay mid hore iyo in uu yahay sawir cusub?
Habkan waxaa loo yaqaanna 'Raadinta sawirka (Image Search), ama dib u eegista sawir raadinta (Reverse image Search)
3. Sawir kastaa ama muuqaal kastaa waxa uu leeyahay, tilmaamo ku dhex duugan oo kaa caawinaya in aad hubiso sawirka runnimadiisa. Tusaale ahaan astaamo, tilmaamo, ama xaaladaha cimilada ee sawirka dhabarkiisa ka muuqdaa ma yihii kuwo waafaqsan waxa uu ka hadlayo ama halka lagu sheegayo. Tusaale ahaan sawir lagu sheegayo Soomaaliya, haddii aad aragto in dhabarka dambe ee sawirka laga arkayo baraf, ama astaan aan ahayn kuwa lagu yaqaanno magaalooyinka Soomaalida. iwm.
4. Raadi marag iyo xogo dheeraad ah oo warkan runnimadiisa xoojinaya. Tusaale ahaan dadka faallooyinka iyo hadallada ay dadka kale sawirka ka bixinayaan? Xogaha iyo wararka ay arrintan ka sheegeen warbixinaha warbaahinta ee shaakadan la xidhiidhaa.
5. Isku day in aad hesho cid joogta goobta dhacdadu ka dhacday oo kuu xaqijisa runnimada sawirka ama warka. Ishaas aad warka ka xaqijinaysaa waxa ay noqon kartaa goobjooge ama weriye goobta jooga.





Hubinta Cidda xogta faafisay

Waxaa jira su'aalo ay lagama maarmaan tahay in laga fikiro, marka aad hesho xog ama sawirro la baahiyey:

1. Qofka sawirkan faafiyey baraha bulshada ma ku leeyahay xisaabo ama boggag kale?
2. Qofka sawirkan ama xogtan faafiyey sawirkisu ma u yaallaa barta uu ku faafiyey, mise waa uu is qariyey?
3. Maxaa kale ee uu qofkani ku baahiyahaa baraha bulshada, ama mawduucyada kale ee uu kaga hadlaa maxay yihiiin?

Waa in aad ogaato in ay muhiim tahay in la hubiyo, illaa heerka lagu kalsoonaan karo isha xogta faafisay? Akoonnada baraha bulshada qaarkood ayaa ah kuwo ay shirkaduhu caddaymo siyyeen, sida calaamadda buluugga ah ee Facebook. Laakiin waxaa muhiim ah in aynnu ogaanno in ay jiraan dad si been abuur ah u samaysan kara calaamadden.





Hubinta Sawirka

Waxaa jira dhowr hab oo sawirka looga raadin karo baraha bulshada, si loo hubiyo xaqiiqadiisa.

Waxaa ka mid ah:

1. In aad ka raadiso shabakadaha ‘tineye’ iyo ‘Google images’

Labadan shabakadood waxa ay kuu suurtagelinayaan in aad ogaato in sawirkan hore loogu faafiyey internet ka, iyo taariikhdaan hadda ku qorani in ay tahay tii saxda ahayd ee la faafiyey. Wuxuu aad ku ogaanaysaa in sawirkan hadda aad heshay uu sax ku yahay taariikhda iyo dhacdada lagu sheegay. Si kastaba ha ahaato ee, waa in aad maskaxda ku hayso sawirka oo aad shabakadahan ka weydo, in aanu macnaheedu ahayn in aan hore loo isticmaalin ama in aanu hore u jirin sawirkani. Sidaas awgeed haddii aad sawirka ka weydo shabakadahan, markaba ha ku go'aanqaadan in uu sax yahay.



pic.hao123.com

2e1257fa6f0f692893d3e5bb5279526a

pic.hao123.com/album/wumeizhangweiyi

Crawled on 2013-11-03

pic.hao123.com/gaoxiao_menghuo?style=xl

Crawled on 2013-11-02

[view all 272 matches](#)

[Compare](#) | [Link](#)

JPEG Image

180x180, 61.9 KB

Waxa kale oo muhiim ah in aad ogaato taariikhda ku qoran sawirka aad ka heshay internet ku, in aanay mar kasta sax ahayn. Waxaa dhacda sawir taariikh hore la qaaday, in beri dambe lagu faafiyo internet ka.


Tusaale ahaan sawirka kor ka muuqda waxaa la qaaday sannadkii 2010, laakiin markii laga baadhay shabakadda www.tineye.com waxa ay sheegaysaa in sawirkan internet ka lagu faafiyey sannadkii 2013. Si kastaba ha ahaato ee taariikhda sawirkan lagu faafiyey internet ku waxa ay ina tusaysaa in sawirka aynnu kor ku soo xusnay loo adeegsaday hab been abuur ah, iyada oo laga dhigayo in la qaaday sannadkii 2015. Runtu waxa ay tahay in la qaaday 201, internet kana lagu faafiyey 2013.

2. Goobta sawirka lagu qaaday

Muuqaallada laga arkayo xagga dambe ee sawirka aad qaadanaysaa, waxa ay marar badan kaa caawin karaan xaqijinta runnimada sawirkaas. Shabakadda Google qaybteeda khariiradaha ee dayaxgamceedka ku xidhan ayaa aad ka raadin kartaa sawirradaas, si aad u ogaato halka ay ku yaallaan in ay waafaqsantahay halka uu warku ku sheegayo.

Tusaale ahaan sawirka hoose ka muuqdaa waxa uu muujinaya biyo iyo dhiig isku darsamay, bog Twitter (X) ka ah oo lagu magacaabo ayaa sawirkan baahiyeey, isaga oo cabbiraya dhiigga qulqulaya dalka suuriya, waxa aanu dusha kaga qoray in ay tahay ‘dhiig iyo biyaha roobka/daad isku darsamay’

Markii sawirkan laga baadhay Google Maps, waxaa soo baxay in sawirka xagga dambe ka muuqdaa uu yahay Masaajid ku yaalla magaalada Duuma ee dalka Suuriya. Waa qodob xoojin kara runnimada sawirkan, ugu yaraan in halka laga qaaday ay tahay Suuriya.



This picture on Twitter matches this mosque in Douma.

Cimilada

Sawirka waxaa marar badan si fiican looga dhex arki karaa sida ay ahayd cimilada goobta lagu qaaday.

Shabakadda www.WolframAlpha.com waxa aad ka helaysaa cimilada meel kasta oo dunida ka mid ah; ammin kasta, dhammaan xilliyada sannadka.

Waxa aad ka ogaan kartaa runnimada in sawirka laga qaaday goobta lagu sheegay, adiga oo shabakaddan ka baadhaya goobta iyo taariikhdaas in cimiladeedu sida ka muuqata sawirka ay tahay. tusaale ahaan in taariikhdaas ay daruuruhu cimidh ahaayeen iyo in qorraxdu ay ka muuqatay samada oo saafi ah, iyo guud ahaanba sida ay xaaladda cimilo maalintaas ahayd.

Haddii sawirka ay ka muuqato cimil daruuraysan, laakiin aad ogaato in goobtaas aanay maalintaas wax daruur ahi ka jirin, waxa aad si fudud u go'aansan kartaa in uu sawirku been abuur yahay.

The screenshot shows the WolframAlpha search interface. At the top, there is a red starburst icon followed by the text "WolframAlpha" and the tagline "computational intelligence.". Below this is a search bar with the placeholder "Enter what you want to calculate or know about". Underneath the search bar are several navigation links: "NATURAL LANGUAGE", "MATH INPUT", "EXTENDED KEYBOARD", "EXAMPLES", "UPLOAD", and "RANDOM". A note says "Now Available through ChatGPT PLUS". Below these are four main category sections: "Mathematics", "Science & Technology", "Society & Culture", and "Everyday Life". Each section contains a grid of sub-categories with icons and names:

| Mathematics | Science & Technology | Society & Culture | Everyday Life |
|------------------------|------------------------|---------------------|-------------------|
| Step-by-Step Solutions | Units & Measures | People | Personal Health |
| Elementary Math | Physics | Arts & Media | Personal Finance |
| Algebra | Chemistry | Dates & Times | Surprises |
| Plotting & Graphics | Engineering | Words & Linguistics | Entertainment |
| Calculus & Analysis | Computational Sciences | Money & Finance | Household Science |
| Geometry | Earth Sciences | Food & Nutrition | Household Math |

Hubinta muuqaalka (Fiidyow)

Hubinta runnimada muuqaalku waxa ay u baahantahay, isla xeeladaha iyo xirfadda aynnu xusnay in loo adeegsado hubinta runnimada sawirka.

Tubtan aaya aad u mari kartaa hubintaas:

1. Muuqaalku waa sawirro dhaqaaqaya, sidaas awgeed muuqaal kastaa waxa uu ka koobanyahay sawirro isu tegey. Haddaba muuqaalka koowaad (Sawirka koowaad) ee Fiidyowga aad hubinayso ka qaaa sawirkashaashadda (Screenshot).
2. Isla hannaankii aad martay markii aad sawirka hubinaysay ayaad marinaysaa sawirka-shaashadda ee aad muuqaalkan ka qaadday. Taas oo ah in aad hubiso haddii ay jiraan meelo caan noqon kara oo ka dhex muuqda, iyo in aad hubiso cimilada muuqataa in ay tahay ta runta ah ee goobtaas ka jirtay taariikhdaas.

Tusaale ahaan, waxaa hoos ka muuqda sawirka koowaad ee laga soo qaaday muuqaal ka warramayey, diyaarad Ruushku lahaa oo ka dhacday gobalka Siinaay ee dalka Masar. Sawirka waxaa ka muuqataa cimiladu sida ay markaas ahayd, si la mid ah sawirkii ayaad shabakadda www.WolframAlpha.com uga baadhaysa in deegaanka Siinaay ay cimiladiisu sidan ahayd taariikhda uu muuqaalkani sheegayo.



Kaabayaal Muhiim ah

Shabakadaha hoos ku xusani, waa kaabayaal muhiim ah oo si lacag la'aan ah saxafiga uga caawin kara hubinta sawirka iyo muuqaalka ama xogta lagu baahiyey baraha bulshada.

1. Storyful Multisearch

Waa shabakad qaab farac ah ugu xidhmaysa bogga baadhista xogta ee Google Crome (Google Chrome extension). Waxa ay fursad kuu siinaysaa in aad mar keliya xog ka wada raadin karto baraha kala duwan ee xidhiidhka bulshada. Adeegani waa kaabe waxtar weyn u leh warfidiyeenka, cilmibaadhayaasha iyo cid kasta oo kale oo raadinaysa in ay dhaqso xog uga hesho baraha bulshada.

Isticmaalka:

Marka koowaad waxa aad ku soo dejinaysaa ‘Google Chrome’ oo uu ku xidhiidhsamayo, kaddibna leebka midabka huruudda ah leh oo cidhifka sare ee midigta ka soo muuqanaya ayaa aad gujinaysaa. Waxaa kuu furmaysa daaqad baadhitaan, halkaas ayaa aad ku qoraysaa ereyga ama ereyada furaha u ah waxa aad raadinayso, kaddibna waxa aad gujinaysaa raadi (Search). Waxa uu kuu soo saarayaa bog cusub oo ay ku qoranyihiiin baraha bulshada ee lagu baahiyey ereygaas ama ereyadaas aad weydiisay. Isaga oo mid kasta raacinaya taariikhda, gobta iyo luuqadda baahinta. Waxa kale oo uu fursad kuu siinayaa in aad xogtaas kaydsan karto, ‘Save’ ama aad cid kale la wadaagi karto ‘Share’.

Shabakadaha uu baadho ‘Storyful Multisearch’

Shabakadha “Storyful Multisearch” Waxa ay awood u leedahay in xogta aad weydiisay ay ka baadho shabakadaha Twitter (X), YouTube, Tumblr, Instagram, iyo Spokeo.

Kaabahani waa lacag la'aan ay isticmaali karto cid kasta oo doonayso in ay xog ka hesho baraha bulshada. Waa hab dhaqso badan oo uu saxafigu si fudud isaga hubin karo in xogta ama sawirka uu helay uu run yahay, iyo in cidda lagu sheegay in ay xogta ama sawirka ku faafisay baraha bulshada ay run tahay. Arrintani waxa ay ka hortegeysaa, in aad qaadato xog been abuur ah oo la sheegay in qof aad ku kalsoonaan lahayd uu baraha bulshada ku faafiyey.

2. Shabakadda Tineye

www.tineye.com/image.google.com – Waa shabakad ah farac ku xidhiidhsamaya ‘Google’ ka (Google Chrome Extension), waxa ay kaa caawinaysaa inaad hubiso cimilada deegaan ka jirtay waqtii la sheegay. Tusaale ahaan, in cimilada ka muuqata sawirku ay run tahay in goobtaas uu sheegayo ay taariikhdaas cimiladu sidan ahay.

3. Wolf Ramalpha

www.wolframalpha.com waa shabakad aqooneed su'aalahaaga ka bixin karta jawaabo xog badan xambaarsan, xitaa haddii su'aasha aad weydiisay ay ahayd mid daba-go'an ama aan dhammaystirnayn, ama ay ahayd su'aal carin ah. Waa kaabe awood badan oo loo isticmaali karo ujeeddooyin kala duwan. Daaqadda baadhista ee kuu soo baxaysa marka aad gujiso ayaa aad ku qoraysaa su'aasha aad jawaabta u raadianyo, tusaale ahaan “li sheeg caasimadda dalka Faransiiska?”, “Waa imisa tirada dadka Hindiya?”, “Goorma ayaa uu ahaa dagaalkii sokeeye ee Maraykanku?”, “Yaa qoray buugga xxx?”, “Noloshu waa maxay?” iwm.

Waxa ay ku siinaysaa jawaabo, xitaa ay la socdaan garaafyo, jaantusyo iwm. haddii loo baahanyayah.

Waa kaabe awood badan oo lacag la'aan ah, il xogeed muhiim ahna u noqonaya saxafiga, ardayga, cilmbaadaha iyo cid kasta oo xog adduunka ku aaddan raadinaysa, ama jawaab u doonayso arrimo cilmi, sida furfurista masalooyinka xisaabeed, garaafyada, iyo Istaatistikada, Juqraafiga, taariikhda, xogta filimada, muusikada, buuggaagta iwm.

4. Who is

<https://www.whois.com/> – Waa shabakad su'aalo weydiineed oo loo isticmaalo raadinta xogta la xidhiidha shabakadaha iyo bogagga (Websites) internet ka, sida magaca saxnaanshiyihiisa, cidda leh, shabakadda, cidda lagala xidhiidhi karo, shirkadda diiwaangelinta u samaysay magaceeda, iwm.

Waxa aad gelaysaa cinwaanka shabakadda oo ah ka aynnu kor ku xusnay oo sida oo kalana aad ka geli karto cinwaanka ah <https://whois.domaintools.com/>, kaddibna daaqadda baadhista ee kuu soo baxda ayaa aad ku qoraysaa magaca shabakadda, waxa aanad gujinaysaa raadi (Lookup).

Shabakaddani waxa ay caawinaysaa in la hubiyo magaca shabakadda xogta laga qaadanayo saxnaanshiyihiisa iyo xogta cidda leh ama halku uu ka diiwaangashanyayah.

5. Exif data

<https://exifdata.com/> / www.viewexifdata.com – Exif data (Exchangeable Image File Format) waa shabakad xogeed lagu raad raaco sawirrada la doonayo in la helo asalkooda. Waxa ay caawinaysaa in aad hesho xogta sawirka aad geliso; sida kamaradda lagu qaaday, waqtiga la qaaday iyo goobta lagu qaaday, iyo xitaa farsamada kamaradda ee la isticmaalay, ama qaabka loo qaaday. Waxa kale oo ay suurtagelinaysaa in sawir aad geliso, kaddibna xogtiisa aad ka tirtirto, taas oo kaa caawinaysa in aad dib ugu faafin karto internet ka, isaga oo aan wadan xog laguugu qabsan karo xuquuqdeeda lahaanshiyo.

6. Izitru

www.izitru.com – Izitru waa adeeg internet oo lagu aqoonsan karo sawirrada wax ka beddelka iyo been abuurka lagu dhex sameeyey. Waa shabakad (Website) aad sawirka gelinayso, kaddib ogaanaya in sawirkaas lagu sameeyey wax ka beddel (Photoshop), in qaybo ka mid ah la jaray ama wax aan ku jirin lagu soo daray, midabka ama ilayska sawirka lagu ciyaaray, ama cabbirkiiisa wax laga beddelay, iwm.

Waxa uu ku siinayaa illaa xadka sawirkaas runnimadiisa lagu kalsoonaan karo ama aan lagu kalsoonaan karin, iyo in sawirku aanu iib ahayn oo aad isticmaali karto ama uu iib yahay oo aanad isticmaali karin.

Kaabahan lacag la'aanta ahi waxa uu si weyn u caawiyaa saxafiyiinta, sawirqaadayaasha, cilmibaadhayaasha iyo cid kasta oo u jeellan in ay hubiso sawir runnimadiisa.

Amnesty USA

www.amnestyusa.org/citizen evidence/ – Waa shabakad ay leedahay hay'adda xuquuqada aadamaha ee fadhligeedu yahay Maraykanka, Amnesty International. Shabakaddan waxaa loo adeegsadaa in muuqaallada YouTube ku jira laga soo dhex saaro xogta, iyo qaybaha muuqaallada aan asal ahaan muuqaalka ugu jirin ee marka dambe lagu daray.

Waxaa ka faa'idaysta warfidiyeenka, cilmibaadhayaasha, dembi baadhayaasha, ardayda, dadka ka shaqeeya dhowrista xuquuqda aadamaha, iyo cid kasta oo doonayso in iska hubiso in muuqaalka ay xogta ka qaadanaysaa uu yahay mid la isu gegeeyey iyo in uu asalkisu ahaa muuqaal wada socday.

Liiska tallaabooyinka hubinta sawirka

Si aynnu u hubinno saxnaanshiyaha sawirka ama xogta aynnu ku aragno baraha bulshada, ka hor inta aynnaan xigan, ama sii faafin, waa in aynnu marinnaa tallaabooyinka liiska hoose ku cad.

Ma la xidhiidhay weriyaha goobta xogtu ka dhacday kuu jooga, ama cid kale oo goobta joogta oo xogtaa laga helo karo?

Ma jiraa hab xogtan ama sawirkan looga xaqijin karo il kale oo warbaahineed oo lagu kalsoonaan karo, sida wargeys ama shabakadaha xogta lagu kaydiyo ee internet ka (Timestamps)

Goobta: ma baadhi kartaa astaamaha dhuleed, calaamadaha deegaan, afka lagu hadlayo, ama sumadaha jidadka?

Cimilada: Ma hubin kartaa in cimilada warbixinta ka muuqataa ay tahay cimilada dhabta ah ee goobta uu ka warramayo, ka jirtay maalintaas?

Taariikhda cidda baahisay: Ma hubisay taariikhda iyo xogta shakhsiga ah ee qofka sawirka ama xogta baahiyey, iyo sida oo kale xogaha iyo muuqaallada / sawirrada uu hore u baahiyey?

Xogta: Ma hubisay xogta qudheeda in aan lagu samayn wax ka beddel, ma se jirtaa shabakad lagu hubin karo oo aad isticmaali kartaa? Sida shabakadaha Exif, File type, filters.

Ma ka hubisay marag dheeraad ah: Ma jiraan xogo ama sawirro iyo muuqaallo kale oo isla deegaankaas ama dhacdadan oo kale ka warramaya oo aad la eegtay.

Sidee aad ku heli kartaa xuquuqda isticmaalka xogta

Muhiimadda ay leedahay in aad hesho xog ama qodob wareed, mid la mid ah waxaa leh in aad hesho jid sharci iyo hannaan anshax oo xaq kuu siinaya in aad xogtaas ama sawirkaas isticmaasho, adiga oo dhowraya xuquuqda lahaanshiyaha fikir, isla markaana ilaalinaya isha warka aad ka heshay si waafaqsan xeerarka warbaahineed ee dhaqangalka ah. Wuxuu aynnu hoos ku taxaynaa qaar ka mid ah talooyinka iyo tilmaamaha caawinaya in aad is fahamtaan cidda sawirka iska leh ee aad fasax ka rabto, haddii aad hesho. Sida oo kale isla talooyinkan ayaa loo adeegsan karaa fasax u helidda warka iyo muuqaallada. Haddii aad la xidhiidho cidda sawirka faafintiisa asalka leh, adiga oo raba in aad fasax uga hesho sii faafinta sawirka ama xogta uu isagu baahiyey, raac talooyinkan:

1. Si cad oo faahfaahsan u qeex qofka aad tahay? (Is sheeg)
2. Weydii in uu isagu sawirka leeyahay (Qaaday sawirka), iyo in uu cid kale ka soo qaatay?
3. Weydiiso ogolaanshiyaha isticmaalka sawirka. Waxaa jira dadka qaar sawirka isticmaala iyaga oo aan fasax ka haysan cidda leh, laakiin baahintooda ku xusa (Mention) isha ama bogga baraha bulshada ee ay ka soo qaateen. Marka baraha bulshada laga hadlayo, waa ay kala duwan tahay in sawirka ama xogta oo keliya aad qaadato oo boggaaga aad dhigto, adiga oo cidda leh ama bogga aad ka soo qaadatayna magacaabaya uun (Mention). Iyo in aad sawirka ama xogta oo boggeeda lagu faafiyey taalla aad adigu dib bulshada ugu sii baahiso (Share).

Midda hore waxaa loo tixgeliya, in ay welii meel ka dhac ku noqon karto xuquuqdii lahaanshiyaha gaarka ah (Copyright) ee sawirka ama xogta, xitaa marka aad sheegtay cidda asalka u lahayd sawirkaas ama xogtaas. (Waxa ay ka dhigantahay in aad dib u naqlisay (Sawirtay) sawirkaas ama xogtaas adiga oo aan fasax u haysan. Laakiin midda dambe ee ah in aad bogga oo dhan dadka la wadaagto (Share), waxaa loo arkaa in aanay burinayn xuquuqdii lahaanshiyaha sawirkaas ama xogtaas, fasax toos ah in aad qofkii ka heshana aanay u baahnayn. Waayo ma aad naqlin, ee iyada oo halkeedii taalla ayaad cid kale u gudbisay, sida in aad buug ama sawir isaga oo sidii qofka lahaa u dhigay ah cid kale u dhiibto ama siiso.

4. Cidda sawirka ama xogta leh ee fasaxa aad ka qaadanayso, waa in aad ogeysiiso sida aad sawirkaas ama xogtaas u isticmaalayso iyo halka aad u adeegsanayso, ama ku baahinayso.



5. Xaqlaha sawirka ama xogta weydii, in uu ogolyahay in aad magaciisa ama xuquuqdiisa lahaanshiyo xusto, marka aad dib u faafiso adigu. Waxaa jira dad badan oo aan jeclayn in magacooda la raaciyo xogta ama sawirka laga xiganayo, sababo uun jira awgood.

6. Xaqlaha weydii sida uu doonayo in aad u dhigto xusidda lahaanshiyiisa sawirka ama xogta, dadka qaar baa jecel in magacooda oo keliya la xuso, halka kuwo kalana ay jecelyihiin in lagu xidhiidhiyo ama lagu xuso boggoda ama barta ay ku leeyihiin baraha bulshada, waxa kale oo jira cid jecel in la xuso xilkooda ama sumaddooda bulshana la raaciyo, sida mudane, qoraa, prof, iwm.

7. Xaqlaha weydii in sawirkiisa ama xogtiisu ay tahay mid uu doonayo in uu iibiyo xuquuqdeeda, laakiin marka ay sidaas tahay waa in aad waafajiso siyaasadda tifatir ee shabakadda ama wakaaladda wareed ee xogta aad ku faafinayso.



AL JAZEERA
MEDIA INSTITUTE



AJMIInstitute



📞 +974 44897666

✉️ institute@aljazeera.net

🌐 <http://institute.aljazeera.net>